Waaxda Isgaadhsiinta

WAAJIBAADKA WAAXDA ISGAADHSIINTA.

1. Dejinta qorshayaasha ay ku hawl galayso Waaxda Isgaadhsiintu.
2. Bixinta iyo cusboonaysiinta ruqsadaha adeegyada shirkadaha isgaadhsiineed ee ka hawlgala dalka (ka dib markay ogolaansho ka hesho waaxdu wasiirka iyo agaasimaha guud ee wasaaradda).
3. Maamulidda xidhiidhka isgaadhsiineed ee ka dhexeeya xukuumadda iyo shirkadaha gaar loo leeyahay.
4. Maamulidda iyo bixinta hirarka isgaadhsiineed dalka.
5. Dejinta qorshayaasha lagu horumarinayo laguna maamulaayo isgaadhsiinta dalka.
6. Isku xidhka shirkadaha isgaadhsiinta si macmiilku ula hadli karo qof kasta oo sita telefonka gacanta.
7. Soo jeedinta qiimayaasha khidmadaha kala duwan ee ku waajibay shirkadaha isgaadhsiinta ee ka hawl gala dalka.
8. Diyaarinta khidmadaha ku waajibay shirkadaha isgaadhsiinta iyadoo waaxdu la kaashanayso hay’adaha kale ee dawladda ee ay khusayso.
9. Fulinta xeerarka, sharciyada iyo siyaasadaha u yaalla isgaadhsiinta dalka.

10. Qabashada iyo u garnaqista cabashooyinka shirkadaha isgaadhsiinta dhexdooda sidoo kale cabashooyinka ka dhexeeya macaamiisha iyo shirkadaha isgaadhsiinta.

11. Ka qayb qaadashada dejinta siyaasadaha, halbeegyada, hagayaasha, istiraatiijiyadaha iyo xeerarka lagu maamulayo Isgaadhsiinta dalka

12. Ilaalinta xuquuqda iyo xoriyadda Isgaadhsiineed ee muwaadiniinta Somaliland.

13. Kormeerida tayada adeegyada ay bixiyaan shirkadaha isgaadhsiinta ee dalku.

14. Nidaaminta (Regulating) qiimayaasha adeegyada isgaadhsiineed ee ay bixiyaan shirkaduhu.

15. Kor u qaadidda iyo kobcinta dakhliga ka soo gala dawladda isgaadhsiinta.

16. Hubinta & ogolaanshaha tayada qalabka isgaadhsiinta ee dalka soo galaya.

17. Fulinta awaamiirta ku saabsan isgaadhsiinta ee kasoo baxa xafiiska wasiirka iyo agaasimaha guud ee wasaaradda.

18. Ka go’aan qaadashada dhismayaasha kaabayaasha isgaadhsiineed ee dalka sida taawarada iyo wixii lamid ah.

19. La xidhiidhka haya’daha isgaadhsiineed ee caalamka.